# Habraaca Tuubbada Caloosha (G-tube)

### Gastrostomy Tube (G-tube) Pathway - Somali

G-tube waa tuubbo quudin oo la geliyo caloosha. Si G-tube loo geliyo, dhakhtar ayaa dalool yar (oo loo yaqaan 'stoma' ama 'gastrostomy') ka sameeya caloosha kadibna tuubbada geliya. Habraacani wuxuu sharxayaa waxa la filan karo kahor, inta lagu jiro, iyo kadib gelinta G-tube.

### 1. Go'aaminta haddii G-tube ku habboon tahay ilmahaaga

Adiga iyo/ama daryeelahaaga ayaa la kulmi doona dhakhtar si aad uga wada hadashaan baahiyaha quudinta iyo nafaqada. Haddii G-tube lagula taliyo, waxaa laguu gudbin doonaa Rugta Carruurta ee G-tube. Halkaas, waxaad kula kulmi doontaa dhakhtar si aad wax badan uga barato gelinta G-tube.

### 2. Ballanta Rugta Carruurta ee G-tube

Waxaad la kulmi doontaa dhakhtar si aad:

- Wax uga barato xulashooyinka G-tube iyo daryeelka joogtada ah
- Uga hadasho faa'iidooyinka iyo khataraha habraaca
- Su'aalo u weydiiso oo aad ula wadaagto walaacyadaada

Taageerada dadka khibradda la midka ah leh ayaa sidoo kale la heli karaa si ay kaaga caawiso habka go'aan gaarista.

Haddii aad go'aansato inaad sii waddo gelinta G-tube, waxaan kuu qaban doonnaa ballan aad la yeelato dhakhtarka guud ee qalliinka si aad uga wada hadashaan habraaca.

### 3. Muddaynta Ballamaha Kahor Qalliinka (Pre-Op) iyo Kadib Qalliinka (Post-Op)

Kahor Qaliinka:

- Ballan lala yeesho dhakhtarka guud ee qalliinka si habraaca looga sii wada hadlo.
- Qiimayn caafimaad oo faahfaahsan (badanaa lala sameeyo dhakhtarka koowaad) ayaa loo baahan yahay **30 maalmood gudahood kahor** qalliinka.
- Waxaad la kulmi doontaa nafaqeeye diiwaangashan oo Gillette ah **hal toddobaad kahor** qalliinka.

Qaliinka Kadib:

- Waxaad ballan dabagal ah ku yeelan doontaa rugta carruurta ee G-tube **1 ilaa 3 toddobaad** kadib qalliinka si loo hubiyo meesha la jeexay iyo in G-tube si fiican u shaqaynayso.
- Qiyaastii **6 toddobaad** kadib qalliinka, waxaad mar kale la kulmi doontaa nafaqeeyaha.
- Qiyaastii **3 bilood** kadib qalliinka, waxaad la kulmi doontaa dhakhtar ku takhasusay G-tube si uu G-tube u beddelo.
- Qiyaastii **6 bilood** kadib qalliinka, waxaad mar kale la kulmi doontaa dhakhtar ku takhasusay G-tube si uu G-tube u beddelo.

#### 4. Qaliinta Tumbada la geliyo caloosha (G-Tube)

G-tube waxaa la geliyaa inta lagu jiro qalliinka.

#### 5. Joogitaanka Isbitaalka Qalliinka Kadib

### Qorshaha Quudinta

Kooxdaada daryeelka, oo ay ku jiraan dhakhtarka isbitaalka iyo nafaqeeye, ayaa samayn doona qorshe quudin oo buuxiya baahiyahaaga nafaqo.

### Qalabka Guriga

Shaqaale bulsho iyo shaqaalaha kalkaalinta ayaa gacan ka geysan doona diyaarinta:

- Qalabka G-tube
- Qalabka quudinta
- Shirkad qalabka daryeelka guriga keenta (iibiye)

### Barashada Daryeelka G-tube

Kahor intaadan guriga aadin, kooxdaada daryeelka ayaa ku bari doonta sida loo:

- Daryeelo G-tube
- Bixiyo quudinta
- Isticmaalo qalabka iyo agabka
- Garto goorta caawimo la wacayo

## Guriga Aadista

Dadka badankoodu waxay guriga ku laabtaan 24 ilaa 48 saacadood gudahood kadib qalliinka haddii xaaladdoodu wanaagsan tahay oo ay quudinta u dulqaadanayaan.

## Maareynta Quudinta Marka Isbitaalka Laga Saaro Kadib

Dhakhtarkaaga koowaad ama dhakhtarka daryeelka xaaladaha adag ayaa kaa caawin doona maareynta quudinta marka isbitaalka lagaa saaro kadib.

Nafaqeeyuhu wuxuu kugula talin doonaa:

- Nooca caanaha la diyaariyey
- Jadwalka quudinta
- Isbeddel kasta oo nafaqo oo loo baahan yahay

Waxaad heli doontaa waraaqaha daawooyinka sida loogu baahdo.

### 6. Wicitaanka Taleefanka ee Dabagalka

Isku-duwaha kalkaalinta ee saaritaanka isbitaalka ayaa ku soo wici doona 1-3 maalmood kadib markaad guriga tagto si uu u hubiyo in wax walba si fiican u socdaan ugana jawaabo su'aalahaaga.

### 7. Ballanta Rugta Carruurta ee G-tube (1 ilaa 3 toddobaad kadib qalliinka)

Ballantan, dhakhtar carruurta ah oo ku takhasusay G-tube ayaa:

- Hubin doona meesha la jeexay
- Ka caawin doona walaacyada quudinta iyo la qabsiga daryeelka maalinlaha ah ee G-tube
- Wax ka qaban doona dhibaato kasta oo ka jirta meesha G-tube
- Ka jawaabi doona su'aalaha

### 8. Ballanta Nafaqeeyaha (qiyaastii 6 toddobaad kadib qalliinka)

Ballantan, waxaad la kulmi doontaa nafaqeeye diiwaangashan. Booqashadan waxaa ka mid noqon doona:

- Hubinta miisaanka
- Dib-u-eegista nafaqada

- Cusboonaysiinta qorshaha quudinta, haddii loo baahdo

### 9. Ballanta Rugta Carruurta ee G-tube (3 bilood kadib qalliinka)

Waxaad ku laaban doontaa rugta carruurta ee G-tube. Booqashadan, G-tube ayaa markii ugu horreysay la beddeli doonaa. Dhakhtarku wuxuu hubin doonaa sida aad uga soo baxaysid quudinta iyo daryeelka G-tube.

### 10. Ballanta Rugta Carruurta ee G-tube (6 bilood kadib qalliinka)

## Qorshaynta Beddelka G-tube ee Mustaqbalka

Inta badan G-tube-yada waxay u baahan yihiin in la beddelo 3-dii biloodba mar.

Qoysas badan ayaa barta sida G-tube loogu beddelo guriga. Waxaan ku bari doonnaa sida loo sameeyo waxaana kaa caawin doonnaa inaad go'aansato goorta aad diyaar dareemayso.

Haddii aadan ku qanacsanayn inaad G-tube guriga ku beddesho, kooxdaada daryeelka caafimaadku waxay kula shaqayn doontaa sidii loo samayn lahaa qorshe G-tube mustaqbalka loogu beddelo rugta caafimaadka ilaa aad diyaar u tahay inaad guriga ku beddesho.

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay ujeeddooyin waxbarasho oo keliya. Looguma talo gelin inay beddesho talada bixiyeyaasha daryeelka caafimaadkaaga. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama dadka kale ee kamid ah kooxdaada daryeelka caafimaadka.

Haddii aad tahay bukaanka Gillette oo leh su'aalo degdeg ah ama walaacyo, fadlan la xiriir Khadka Caawinta Kalkaalisada ee Gillette's lambarka 651-229-3890.

Macluumaadka boggan waxaa dib u eegay **tifaftirayaasha caafimaadka ee Gillette Children's** si loogu isticmaalo ujeeddooyin waxbarasho oo guud.